**Katakiiska Caruurta**

## Hordhac

"Kaatakiiska Carruurta Dhallinyarada ah", oo laga soo qaatay waxyaabaha aasaasiga u ah Qirashada Iimaanka ee Westminister asal ahaan waxaa qoray Joseph P. Engles. Iyadoo loo arkay in ay carruurtu u baahan tahay qoraal sahlan oo ay fahmi karaan ayaa lagu qiyaasay "Kaatakiiska Gaaban" waxaana lagu daray su'aalo ku saabsan soo noqoshada dambe ee Masiixa.

CMI (Children Ministry International) waxa ay qoraalkii hore ee Engels ee Ingniriisiga ahaa ee "thee" oo Af Soomaali ku ah "adiga" oo hal qof ka hadlaysa iyo "thou" oo hal iyo in ka badan ka hadlaysa u beddeleen luuqadda Iniriisiga ee casriga ah marka loo eego tarjuumaaddii hore ee King James. Micnaha waa isaga mid oo waxba kuma kala duwana. Sidoo kale waxaa lagu sameeyay isbeddelladan soo socda.

1. Su'aalaha 16-19 wax ayaa lagu daray iyadoo la adeegsanayo Kaatakiiska weyn iyo kan Yar si taxanaha qaybta C looga dhigo maktabad cajiib ah, oo noqota mawduucyo taxane ah oo Kitaabka Qudduuska ah.

2. Su'aasha 24, "Sideed ku garan kartaa inaad naf leedahay?" waxa ay dib inoo baraysaa jawaabtii Engleska ku saabsanayd nafteenna.

3. Su'aalaha 27,28 iyo 34 waxaa loogu daray in ay si buuxda u sharraxaan xidhiidhka Axdiga Ilaah, si taxanahan loo kaamil yeelo.

4. Su'aasha 62, "Waa maxay amaanista?" ayaa lagu daray.

5. Su'aasha 139 ee ku saabsan baabtiiska (biyo ku sayrista) carruurta waa la beddelay maxaa yeelay waxaannu doonaynaa in aynu hubsanno in dib u dhalashadu aysan biyaha la dhex galayn baabtiiska ilmaha dhashay. (Ogsoonoow: Dadka wax ka qaba baabtiiska baabtiiska carruurta, si fudud ayey isaga saari karaan casharkan si aysan u waayin saamaynta iyo dulucda ku jirta casharrada kale ee ku saabsan dabaaldegga (Sacrament-ga.)

Maaddaama kaatakiiska carruurta aynu isticmaalayno aasaaskeenna ah "Dhisidda Cutubyo isku xidhan oo Iimaankeenna khuseeya Kitaabka Qudduuska" waxaan buuggna yar u

qaybinnay 14 qaybood oo mawduucyo kala duwan ah oo ku salaysan jadwalkeenna. Tixraacyada qorniinka waxaa loogu soo daray sidii ugu habboonayd ee loo xifdin lahaa aayadaha oo hab fudud ah. Waxaan tan ugu soo darnay sidii ay ardaydu waxbarasho dhammaystiran ugu noqon lahaayeen oo ay u hagi lahaayeen.

Qormada qaybteeda sadexaad, waa xafidaadda aayadaha ku saabsan su'aalaha 7-11 kuwaas oo ka turjumaya 2000 bishii September ku noqoshada akhrinteedii taxanihii qormadii B. waxayna ugu ektaay xafidaadoodii aayadaha ( xagga hoose ee boggaga 7 iyo 8) waa kuwa la socday casharadii hore ee taxanii hore ee B.

## Kaatakiisan

## Taxanaha A

### Su'aalaha: Kumaa, Maxaa, Sababtee iyo Sidee (ee ka hadlaya abuurka)

1. Kumaa ku abuuray?
   *Ilaah.*
   **AX:** Bilowgii 1:27, "…Ilaah Nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray."

2. Maxaa kale oo uu Ilaah sameeyay?
   *Ilaah wax kaste ayuu abuuray.*
   **AX:** Yooxanaa 1:3, "Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis."

3. Sababtee baa Ilaah waxan oo dhan kuugu sameeya?
   *Amaantiisa u gaarka ah awgeed.*
   **AX:** 1 Korintos 10:31, "Haddaba haddaad wax cuntaan. ama wax cabtaan, ama wax kastaad samaysaan, dhammaan u wada sameeya Ilaah ammaantiisa."

4. Sidee baad Ilaah u ammaani kartaa?
   *In aan jeclaado oo aan sameeyo wixii uu igu amray.*
   **AX:** Yooxanaa 14:15, "Haddii aad i jeceshihiin, qaynuunnadayda waad xajin doontaan."

5. Sababtee kugu qasbaysa inaad Ilaah ammaantid?
   *Maxaa yeelay Isaga ayaa I abuuray ina daryela.*
   **AX:** 1 Butros 5:7, "Welwelkiinna oo dhan isaga saara, maxaa yeelay, isagu dan buu idinka leeyahay ."

**Taxanaha B**
**Su'aalo iyo Jawaabo Ilaah ku saabsan**

6. Ma waxaa jira ilaahyo badan mise hal Ilaah?
   *Waxaa jira hal Ilaah oo qudha.*
   **AX:** Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4, "Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya."

7. Immisa shaqsiyadood ayuu Ilaah isu muujiyey?
   *Saddex shaqsiyadood.*

8. Maxay kala yihiin?
   *Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah.*
   **AX:** Luukos 4:18a, "Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo."

**Ogsoonoow:** -------------

----------------------

9. Waa maxay Ilaah?
   *Ilaah waa Ruux, mana laha wax jidh ah sida aadanaha oo kale.*
   **AX:** Yooxanaa 4:24, "Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo runta."

10. Halkee buu Ilaah Joogaa?
    *Ilaah meel kastuu joogaa.*

11. Ilaah miyaad arki kartaa?

*Maya;Anigu Ilaah ma arki karo laakiin Isaga ayaa mar kasta I arka.*
**AX:** Maahmaahyadii 15:3, "Rabbiga indhihiisu meel kastay jiraan, Iyagoo fiirinaya kuwa xun iyo kuwa wanaagsan."

**Ogsoonoow:** Aayadda loo su'aasha 10aad ee qayntii Septemper 2000 qaybtan B waxa ay ahayd Yeremyaah 23:24b, "Waxaa kaluu Rabbigu leeyahay, Anigu sow kama buuxo cirka iyo dhulkaba?"

12. Miyuu Ilaah wax kasta yaqaan?
    *Haa; Waxba Ilaah kama qarsoona.*
    **AX:** Sabuuradda 139:7, "Bal xaggee baan ruuxaaga ka tagaa? Xaggee baanse wejigaaga uga cararaa?"

13. Ilaah wax walba ma Isagaa sameeyay?
    *Haa;Ilaah isaga ayaa doonistiisa qudduuska ah oo dhan sameeyay.*
    **AX:** Luukos 1: 37, "Waayo. wax aan Ilaah kari doonin ma jiro."

**Taxanaha C**

**Halka Yaababka Ilaah laga barto**

*14.* Hake baad ka baratay sida Ilaah loo jeclaado ee loo addeeco?
*Kitaabka Qudduuska ah oo qura.*
**AX:** Yooxanaa 17:17, "Iyaga qoduus kaga dhig runta, hadalkaagu waa run e."

15. Yaa qoray Kitaabka Qudduuska ah?
*Rag qudduusiin ah oo uu Ruuxa Qudduuska ahu hoggaaminayey.*
**AX:** 2 Butros 1:21, "Waayo, wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay iman dadka doonistiisa, laakiinse dad Ruuxa Qoduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay."

16. Waa maxay sababta Ilaah Kitaabka Qudduuska ah noo siiyay?
*Wuxuu Kitaabka Qudduuska ah inoo siiyay inuu na baro kan uu Isagu yahayiyo inuu na tusosidii aan u noolaan lahayn.*
**AX:** Sabuuradda 119:11, "Waxaan eraygaagii qalbigayga ugu kaydsaday Si aanan kuugu dembaabin."

17. Maxay tahay sababta Ilaah noo siiyay kitaabka Axdigii Hore?
*Wuxuu Axdigii Hore noo siiyay inuu na barosidii uu waddada ugu sii diyaariay Badbaadiyihii uu ballan qaaday.*
**AX:** Sekaryaah 2:10, "Magaalada Siyoonay, gabay oo rayrree, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu waan imanayaa oo dhexdaadaan degganaan doonaa."

18. Waa maxay sababta Ilaah Axdiga Cusub inoo siiyay?
*Ilaah wuxuu Axdiga Cusub inoo siiyay inuu noogu sheego inuu warkii wanaagsanaa ee Badbaadiyuhu yimid.*

**AX:** Yooxannaa 20:31, "laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah, iyo inaad nolosha ku lahaataan magiciisa idinkoo rumaysanaya."

19. Maxay Axdigii Hore iyo Axdigii Cusub ay inooga ballan qaadayaan Badbaadiyihii sare kacay?
    *Waxa ay Axdigii Hore iyo kan Cusub ay inoo ballan qaadayaan in Badbaadiyuhu uu mar kale carruurtiisa oo dhan u soo laaban doono.*
    **AX:** Cibraaniyada 9:28b, "ayuu dembi la'aan mar labaad badbaadin ugu muuqan doonaa kuwa isaga sugaya."

## Taxanaha D
## Sidee ayaan Ku Ogaan Doonaa Inaan Weligay Noolaan Doono?

20. Yey ahaayeen waaliddiinteenii ugu horreeyay?
    *Aadan iyo Xaawa.*
    **AX:** Bilowgii 3:20, "Ninkiina wuxuu naagtiisii u bixiyey Xaawa, maxaa yeelay, waxay ahayd hooyadii waxa nool oo dhan."

21. Maxaa Ilaah waaliddiinteennii ugu horreeyay ka sameeyay?
    *Ilaah wuxuu jidhkii Aadan ka abuuray dhooboXaawana jodhkii Aadan.*
    **AX:** Bilowgii 2:7, "Rabbiga Ilaah ahuna nin buu ka sameeyey ciidda dhulka, dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii nolosha, ninkiina wuxuu noqday naf nool."

22. Maxaa kaloo Ilaah Aadan iyo Xaawa geliyay jidhka mooyaane?
    *Wuxuu siiyay naf aan marna dhiman lahayn.*
    **AX:** Sabuuradda 103:1, "Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo inta igu jirta oo dhammay, ammaana magiciisa qoduuska ah."

23. Miyaad naf iyo jidh leedahay?
    *Haa; waxaan leeyahay naf aan weligeed dhimanayn.*
    **AX:** 1 Tesalooniika 5:23b, "oo ruuxiinna iyo naftiinna iyo jidhkiinna dhammaan ha la wada ilaaliyo, iyagoo ceeb la' markii Rabbigeenna Ciise Masiix yimaado."

24. Sided ku garan kartaa inaad naf leedahay?
    *Maxaa yeelay waxaa ku ogaan karaa Ilaah iyo dunida cusub ee iman doonta.*
    **AX:** Muujintii 22:12, "Oo bal eeg. anigu dhaqsaan u imanayaa, oo abaalgud-kaygiina waan wataa si aan nin walba ugu abaalgudo sida shuqulkiisu yahay."

25. Xaalad noocee ah ayaa Ilaah Aadan iyo Xaawa ku dhex abuuray?
    *Waxa uu ka dhigaykuwo qudduus ah oo faraxsan.*
    **AX:** Bilowgii 1:31, "... Ilaah wuxuu arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, aad bay u wanaagsanaayeen."

**Taxanaha E**
**Axdiyo iyo Ballanqaadyo**

26. Waa maxay Axdi?
    *Waa heshiss ka dhexeeya labo shaqsi iyo wixii ka badan.*
27. Muxuu yahay axdiga Ilaah sameeyay?
    *Waa ballan Ilaah siiyo dadkiisakuna dhex aasasay Ereygiisa aan la beddeli karin.*
    **AX:** Bilowgii 9:11a, "Oo waxaan idinku adkayn doonaa axdigayga; inta jidh leh oo dhan mar dambe biyo daad ah laguma baabi'in doono"

28. Maxay tahay sababta Ilaah axdiga ula dhigtay dadkiisa?
    *Ilaah qorshihiisa weligiis ahi waa inuu isgu keen muujiyo ballamihii axdigiisa.*
    **AX:** Yeremyaah 32:38-39, "Iyagu waxay ahaan doonaan dadkaygii, oo anna Ilaahood baan ahaan doonaa. … waxaan iyaga siin doonaa qalbi qudha iyo jid qudha, si ay weligoodba iiga cabsadaan, waana inay iyaga iyo carruurtooda ka dam baysaba wanaag helaan."

29. Axdi noocee ah ayaa Ilaah la galay Aadan?
    *Axdi xagga shuqulka ah.*
30. Maxay ahayd in Aadan sameeyo axdigaas dhexdiisa?
    *Si kaamil ah inuu Ilaah u addeeco.*
    **AX:** Bilowgii 2:17, "laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo, xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."

31. Muxuu Ilaah ku dhex ballan qaaday Axdigii shuqulka?
    *Inuu Aadan nolosha ku abaal mariyo haddii uu addeeco.*
32. Ilaah muxuu ugu hanjabay ninkii jebiya axdigii shuqulka?
    *Inuu aadan dhimasho ku ciqaabi doono haddii uu addeeci waayo.*
33. Miyaa Aadan xajiyey axdigii shuqullada?
    *Maya;Ilaah ayuu ku dembaabay.*
    **AX:** Rooma 6:23, "mushahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix."

34. Axdi noocee ah ayaa Ilaah la dhigtay Ciise Masiix, oo ahaa Wiilkiisa?
    *Axdiga nimcada.*
    **AX:** Rooma 5:19, "sida nin keliya caasinimadiisii kuwa badan dembiilayaal looga dhigay, sidaas oo kalena nin keliya addeeciddiis ayaa kuwa badan xaq looga dhigi doonaa."

## Taxanaha F
## Sida Loola Dagaallamo Khiyaanoolaha

35. Waa maxay dembi?
    *Dembigu waa gef ama xadgudublagu xadgudbo sharciga Ilaah.*

36. Waa maxay gafku?
    *Gafku qofka oo samay n waaya wixii Ilaah ka doonayey.*
37. Maxaa loola jeedaa xadgudub?
    *Waa qofka oo sameeya wax Ilaah ka xarrimay.*
    **AX:** Efesos 6:10-11, "… Ku xoogaysta Rabbiga iyo xoogga itaalkiisa. 11  Oo hubka Ilaah oo dhan qaata, si aad u awooddaan inaad sirta Ibliiska hor istaagtaan."

38. Muxuu ahaa dembigii ay sameeyeen waaliddiinteennuu ugu horreeyay?
    *Waxa ay cuneen midhihii laga xarrimay.*
39. Yaa mu jirrabay dembigan?
    *shayddaankii ayaa Xaawa jirrabay, iyaduna Aadan ayey siisay midhihii.*
40. Maxaa waaliddiinteennii ugu horreeyay ku dhacay markii ay dembaabeen kaddib
    *Halkkii ay qudduuska ka ahaayeen oo ay ka faraxsanaan jireen, waxa ay moqdeen kuwo dembi badan oo murugaysan.*
    **AX:** Efesos 6:12, "Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwo amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira."

41. Miyey Aadan oo keliya ku ekaatay jebintii shuqulkii Axdiga?
    *Maya; waxa uu lumiyey noloshii uu weligiis noolaan lahaa.*
42. Muxuu dembigii Aadan u keenay aadanaha oo dhan?
    *Bini aadankii oo dhan waxa au ku dhasheen dembi iyo murugo.*
43. Maxaa loogu yeedhaa dabeecadda dembiga ee aan Aadan  ka dhaxalnay?
    *Dedmbiga asalka ah.*

**AX:** Efesos 6:13, “Haddaba sidaas daraaddeed hubka Ilaah qaata si aad u awooddaan inaad maalinta sharka iyaga is-hor taagtaan. oo markaad saas oo dhan yeeshaan aad awooddaan inaad istaagtaan.”

44. Muxuu dembi kastaahi mudan yahay?
    *Cadhada iyo habaarka Ilaah.*
45. Miyuu qofku dabeecadda dembiga la geli karaa jannada?
    *Maya; waa in qalbiyadeenna la beddelaa si aan jannada u galno.*
46. Maxaa isbeddelka qalbiga loogu yeeraa ama lagu magacaabaa?
    *Waxaa lagu magacaabaa dibu dhalasho.*
47. Yaa beddeli kara qalbiga dembiilaha?
    *Ruuxa Qudduuska ah oo qura.*
    **AX:** Tiitos 3:5-6, “Inaguma uu badbaadin shuqullada xaqnimada oo aynu samaynay, laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyey nadiifinta dhalashadii labaad iyo cusboonaysiinta Ruuxa Qoduuska ah, oo uu aad inoogu shubay oo uu inoogu soo dhiibay Badbaadiyeheenna ah Ciise Masiix;”

## Taxanaha G
## Abuurka Cusub

48. Miyaa qofku ku badbaadi karaa axdiga shuqullada?
    *Qofna kuma badbaadli kari axdiga shuqullada.*
49. Maxay tahay sababta uusan qofku ugu badbaadu karin axdiga shuqullada
    *Maxaa yeelay waa uu burburay oo eed ayaa ka timid.*
50. Yuu ahaa qofka uu Ilaaha aabbaha ahu siiyay axdiga nimacada?
    *Masiixa oo ah Wiilkiisa abadiga ah.*
51. Yuu Masiixu u matalaa xagga axdiga nimcada?
    *Dadkiisa uu doortay.*
    **AX:** Rooma 8:16-17a, “Ruuxa qudhiisu wuu markhaati furaa oo wuxuu ruuxeenna u sheegaa inaynu innagu nahay carruurta Ilaah. 7 Oo haddaynu carruur nahay, de haddaba waxaynu nahay kuwo wax dhaxla, kuwo Ilaah dhaxla oo Masiix wax la dhaxla”

52. Yuu masiixu u qaadayaa axdiga nimcada?
    *Inuu dadkiisa u xafido sharciyada oo dhan, una silco dembiyadooda awgood.*

53. Miyuu Sayidkeenna Ciise Masiix ku dhacay wax dembi ah haba yaraadee?
    *Maya; waxa uu ahaa mid qudduus ah,oo dhib la’aan ah oo aan la doorin karin.*
54. Side bay ahayd inuu Wiilka Ilaah u silco?

*Masiixa oo ah Wiilka Ilaah ah jidh bini aadan ayuu soo qaatay si uu u adeeco Aabbaha oo uu u silco innaga aawadeen.*

55. Maxaa loola jeedaa macnaha ereyga waaqdhaac?
    *Masiixu waxa uu keenay caddalad xagga Ilaah ka timid, taasoo ku timid siliciisii iyo dhimashadiisii uu dembiilayaasha u dhintay.*
    **AX:** Efesos 5:1-2, "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida carruur la jecel yahay. 2 Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa, oo uu nafsadiisii inoogu bixiyey inuu Ilaah u ahaado qurbaan iyo allabari oo u ahaado caraf udgoon."

56. Muxuu Ilaaha Aabbaha ahu u sameeyay axdiga nimcada?
    *Inuu xaq iyo qudduus ka dhigo kuwa ay tahay in Masiixu u dhinto.*

57. Waa maxay micnaha ereyga xaq-kadhigid?
    *Waa Ilaah cafintiisa dembiilayaasha, si uu uga dhigo kuwo aan wax dembi ah lahayn.*
    **AX:** Ishacyaah 43:25, "Aniga qudhayda weeye kan xadgudubyadiinna tirtira. aawaday baan u tirtiraa, oo dembiyadiinnana sooma aan xusuusan doono."

58. Waa maxay qudduus ka dhigid?
    *Waa dembiilayaasha oo qalbigooda iyo dabeecaddooda qudduus laga dhigo.*
    **AX:** II Tesaloniika 1:3b, "rumaysadkiinnu aad buu u kordhayaa, jacaylka aad kulligiin isu qabtaanna waa badnaanayaa."

59. Kuwee Masiixa addeeca ee u silca?
    *Kuwa uu aabbuhu siiyay Isaga.*

60. Nolol noocee aha ayaa Masiixu ugu dhex noolaa adduunka?
    *Nolol saboolnimo iyo silic ah.*
61. Dhimasho noocee ah ayaa Masiixu dhintay?
    *Dhimasho xanuun iyo ceeb badan iskutallaabta dusheeda.*
    **AX:** Cibraaniyada 2:18, "Waayo, isaga qudhiisu wuu xanuunsaday isagoo la jirrabay, taas aawadeed wuu karaa inuu caawiyo kuwa la jirrabo."

62. Waa maxay ammaanmitaan?
    *Waa Ilaah oo dadkiisa ka dhiga kaamil jidh ahaan iyo naf ahaan intaba.*
    **AX:** I Yooxannaa 3:2 ". . . imminka waxaynu nahay carruurta Ilaah; oo weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale, waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay."

## Taxanaha H

**Ruuxa Qudduudka ah**
**Caawiyaheenna**

63. Yaa badbaadaya?
*Kii dembiyadiisa ka tawbad keena, ee Masiixa rumeeya oonolol qudduus ah ku socda.*

64. Waa maxay micnaha tawbad keen?
*Waa dembiga oo laga xumaado, oo la naco lagana fogaado maxaa yeelay Ilaah dembiga kuma farxo.*
65. Maxaa loola jeedaa rumaynta iyo aamminitaanka Masiixa?
*Waa Masiixa oo keliya oola rumaysto inuu yahay kan lagu helo badbaadada.*
**AX:** Rooma12:2, "Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah."

66. Miyaad awooddaada mu rumayn kartaa uguna tawbad keeni kartaa Masiixa?
*Maya; wax wanaag ah ma samayn karo caawimaadda Ruuxa Qudduuska ee Ilaah la'aantiis.*
67. Sided ku heli kartaa caawimaadda Ruuxa Qudduuska ah?
*Ilaah ayaa inoo sheegay inaan ka barinno Ruuxiisa Qudduuska ah.*
**AX:** Taariikhda Labaad 20:12b, "annagu itaal uma hayno guutadan weyn oo nagu soo socota, oo weliba wax aannu samaynona ma naqaan, laakiinse indhahayagu adigay kuu soo jeedaan."

68. Immisa ayaa laga joogaa dhimashadii Masiixa?
*In ka badan 1900 oo sannadood.*
**AX:** 2 Butros 3:9 "Rabbigu kama raago inuu ballankiisa oofiyo sida dadka qaarkiis ku tiriyo inay tahay raagid, laakiinse idinkuu idiin dulqaadanayaa, oo dooni maayo in qofnaba halligmo, laakiinse wuxuu doonayaa in kulli la wada toobad keeno."

69. Sidee ayey dadku u badbaadi kareen imaanshihii Masiixa ka hor?
*Rumaysashada in Badbaadiyuhu imanayo.*
70. Side ayey rumaysadkooda ku muujin karaan?
*In ay waaq-dhaac Ilaah ugu bixiyaan meesha Allabbariga.*
71. Maxay aallabriyadani u taagnaayeen?
*Maxiisa, oo ah Wanka Ilaah, oo ay ahayd inuu u dhinto dembiilayaasha*
**AX:** Cibraaniyada 12:1, "Sidaas daraaddeed, innagoo haysanna markhaatiyaal badan oo sida daruur u weyn oo inagu wareegsan, aynu iska dhigno culays kasta iyo dembiga dhibyaraanta inoogu dhegaya, oo aynu adkaysasho ku orodno tartanka ina hor yaal."

**Taxanaha K**
**Nebiyo, Wadaaddo, Boqorro iyo Aniga**

72. Boosasa darajo oo noocee ah ayaa Masiixu lahaa?
    *Saddex boos.*
73. Maxa kala yihiin?
    *Darajo nebinimo, mid wadaadnimo iyo mid boqornimo.*
    **AX:** Matayos 28:18, "Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey."

74. Sidee buu Masiixu nebi u yahay?
    *Maxaa yeelay waxa uu ina baraa doonista Ilaah.*
75. Maxay tahay sababta aad ugu baahan tahay in Masiixu nebi kuu noqdo?
    *Maxaa yeelay waxaan ahay jaahil.*
    **AX:** Yooxanaa 1:4, "Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka."
76. Side buu Masiixu u yahay wadaad?
    *Maxaa yeelaywuxuu u dhintay dembiyadeennii oo Ilaah inagu xidhay.*
77. Maxad ugu baahan tahay in Masiixu kuu noqdo wadaad?
    *Maxaa yeelay eedaysane ayaan ahay.*
    **AX:** Yacquub 2:10, "Ku alla kii sharciga oo dhan xajiya oo qaynuun keliya ku gafa, kulli wuu ku eedaysan yahay."

78. Side buu Masiixu u yahay boqor?
    *Maxaa yeelay waa uu na maammulaa wuuna na difaacaa.*
79. Maxaad ugu baahan tahay in Masiixu kuu noqdo boqor?
    *Maxaa yeelay waxaan ahay mid daciif ah oo aan caawimaad haysan.*
    **AX:** Sabuuradda 24:8, "Bal waa ayo Boqorka ammaantu? Waa Rabbiga xoog iyo itaal badan, Waa Rabbiga dagaalka ku xoog badan."

**Taxanaha L**
**Sababtee Ilaah u bixiyay Amarrada?**
**Volume 1**

80. Immisa amar ayaa Ilaah ku bixiyay Buur Siyood dusheeda?
    *Toban amar.*
81. Maxay yihiin tobanka amar maxaase mararka qaar loogu yeeraa?
    *Decalouge*
82. Maxay afarta amar ee ugu horraysa ina barayaan?
    *Waajibka ilaah inaga rabo*
83. Maxay lixda amar ee dambe ina barayaan?

*Waajibka dadka kale inaga saran*

84. Maxay isu gayn tobanka amar?
*Inaan Ilaah ka jeclaado qalbigayga oo dhan, iyo inaan deriskayga u jeclaado sida naftayda ii kale.*
85. Deriskaagu waa kuma?
*Dadka agagaarkayga deggan oo dhan waa deriskayga.*
86. Miyaa Ilaah ku farxaa kuwa Isaga jecel ee addeeca?
*Haa; oo wuxuu ydhaahdaa, "waan jeclahay kuwa Aniga o jeclaada."*
87. Miyuu Ilaah ka xumaadaa kuwa aan jeclayn ee aan addeecin Isaga.
*Haa; Ilaah waa u cadhoodaa kuwaq sharka leh maalin walba.*
**AX:** Luukos 10:27-28b ". . . Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan, iyo caqligaaga oo dhan, deriskaagana waa inaad u jeclaataa sida naftaad. . . Sidaas yeel oo waad noolaan doontaa."

88. Muxuu yahay amarka ugu horreeya?
*Amarka koowaad waxaa weeye "Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan"*
89. Muxuu amarka koowaad ina barayaa?
*Inaan Ilaah oo qura caabudno.*
**AX:** Baxniintii 20:3, "Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan."

90. Muxuu amarka labaad ina barayaa?
*Amarka labaad waxaa weeye "Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah Xaasid ah, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, Oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya."*
91. Muxuu amarka labaad ina barayaa?
*Inaan Ilaan si qaas ah u caabudno, oo aan sanam caabudidda iska ilaalinno.*
**AX:** Baxniintii 20:4-6, "Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah Xaasid ah, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, Oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya."

92. Muxuu yahay amarka saddexaad?

*Amarka saddexaad waa "Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada."*

93. Muxuu amarka saddexaad ina barayaa?
    *Inaan magaca Ilaah u ilaalinno erey ahaan iyo ficil ahaan intaba.*
    **AX:** Baxniintii 20:7, "Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada."

94. Muxuu yahay amarka afraad?
    *Amarka afraad waa, "Xusuuso maalinta sabtida, inaad qoduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, 10 laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; 11 waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakadeeyey maalintii sabtida ahayd oo qoduus uga dhigay."*
95. Muxuu amarka afraad ina barayaa?
    *In maalinta sabtida qudduus laga dhigo.*
96. Maalintee ayaa Masiixiyiinta Sabti u ah toddobaadka dhexdiisa?
    *Maalinta ugu horraysa toddobaadka oo loogu yeero maalinta Rabbiga.*
97. Maxaa loogu magacaabay maalinta Rabbiga.
    *Waa maalintaas Masiixa ayaa dhimashadii ka sare kacay.*
98. Maxaa Sabtida la sameeyaa?
    *Tukasho iyo ammaan, in la maqlo oo la akhriyo ereyga Ilaah iyo in wax wanaagsan loo sameeyo dadka inagu xeeran.*
    **AX:** Baxniintii 20:8-11, "Xusuuso maalinta sabtida, inaad qoduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, 10 laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; 11 waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakadeeyey maalintii sabtida ahayd oo qoduus uga dhigay."

**Taxanaha L**

**Sababtee Ilaah u Bixiyay Amarrada?**
**Volume 2**

99. Muxuu yahay amarka shanaad?
*Amarka shanaad waa, "Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo."*

100. Muxuu amarka shanaad ina barayaa?
*Inaan addeecno waaliddiinteena iyo macallimiinteenna.*
**AX:** Baxniintii 20:12, "Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo."

101. Muxuu yahay amarka lixaad?
*Amarka lixaad waa, "Waa inaanad qudh gooyn"*

102. Muxuu amarka lixaad ina barayaa?
*Inaan cadhada u gaabinno*
**AX:** Baxniintii 20:13, "Waa inaanad qudh gooyn."

103. Muxuu yahay amarka toddobaad?
*Amarka toddobaad waxaa weeye, "Waa inaanad sinaysan."*

104. Muxuu amarka toddobaad ina barayaa?
*Inaan daahir ka ahaanno xagga qalbiga, luuqadda aan adeegsanayno iyo dabeecadda.*
**AX:** Baxniintii 20:14, "Waa inaanad sinaysan."

105. Muxuu yahay amarka siddeedaad?
*Amarka siddeedaad waa, "Waa inaanad waxba xadin"*

106. Muxuu amarka siddeedaad ina barayaa?
*Inaan noqo daacad iyo xilkas.*
**AX:** Baxniintii 20:15, "Waa inaanad waxba xadin."

107. Muxuu yahay amarka sagaalaad?
*Amarka sagaalaad waa, "Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin."*

108. Muxuu amarka sagaalaad ina barayaa?
*Inaan runta sheegno.*
**AX:** Baxniintii 20:16, "Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin."

109. Muxuu yahay amarka tobnaad?
*Amarka tobnaad waxaa weeye, "Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan"*

110. Muxuu amarka tobnaad ina barayaa?
*Inaan booskayaga ku ekaanno.*

**AX:** Baxniintii 20:17, "Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan."

111. Miyey aadanuhu si buuxda u ilaalin karaan amarradan?
*Ma jiro aadane si buuxda u ilaaliyey tobankan amar laga soo bilaabo xilligii aadan dembiga ku dhacay.*

112. Maxay tahay faa'idada noogu jirta tobankan amar?
*Waxa ay ina baraan waajibaadka ina saaraniyo sida aan Badbaadiye ugu baahan nahay.*
**AX:** Luukos 10:27,28b, "…Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan, iyo caqligaaga oo dhan, deriskaagana waa inaad u jeclaataa sida naftaada. . . Sidaas yeel oo waad noolaan doontaa."

## Taxanaha M
## Su'aalo iyo Jawaabo ku Saabsan Salaadda Rabbiga

113. Waa maxay salad ama duco?
*Salaaddu waa Ilaah oo la weyddiisto wixii uu ballan qaaday inuu bixinayo.*

114. Magicee ayaannu ku baryaynaa?
*Magaca Masiixa oo qura.*

115. Side ayaa Masiixu inuu baray inaan u tukanno?
*Wuxuu inagu baray Baryada Rabbiga.*
**AX:** Filiboy 4:6, "Waxba ha ka welwelina, laakiinse wax kastaba baryadiinna Ilaah ku ogeysiiya tukasho iyo duco mahadnaqid la jirto."

116. Kusoo cesho baryada Rabbiga.
*"Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu qoduus ha ahaado. 10 Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. 11 Kibis maalin nagu filan, maanta na sii.12 Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan.13 Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortoo yada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin."*
**AX:** Matayos 6:9b-13.

117. Immisa codsi ayaa ku jira baryada Rabbiga dhexdeeda?
*Lix.*

118. *Waa maxay dalabka ugu horreeya?*
*"magacaagu qoduus ha ahaado."*

119. Maxaan ku ducaysanaa dalabka koobaad?

*In dhamaanteen aan magaca Rabbiga qudduus ka dhigno.*

**AX:** Muujijntii 5: 13b, "Kan carshiga ku fadhiya iyo Wanka ha u ahaadeen mahad, iyo ciso, iyo ammaan, iyo xoog, weligood iyo weligood."

120. Waa maxay dalabka labaad?

*"Boqortooyadaadu ha timaaddo."*

121. Maxaan dalabkan labaad ugu ducaysanaa?

*In injiilka lagu wacdiyo adduunka oo dhan oo aan rumayno oo aan addeeco annaga iyo aadanaha kale oo dhan.*

**AX:** Rooma 14:17, "boqortooyada Ilaah ma aha cunid iyo cabbid, laakiinse waa xaqnimada iyo nabadda iyo farxadda ku jira Ruuxa Qoduuskaa."

122. Muxuu yahay codsiga saddexaad?

*"doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo."*

123. Maxaannu ku ducaysannaa dalabka saddexaad dhexdiissa?

*In aadanuhu ay dhulka Ilaah ugu adeegaan si la mid ah sida ay malaa'iguhu ku sameeyaan jannada.*

**AX:** 2 Timoteyos 2:15, "u dadaal inaad nafsaddaada loo bogay Ilaah siisid, adigoo ah shaqeeye aan dadka ka xishoonin, oo hadalka runta ah si hagaagsan u wada."

124. Muxuu yahay codsiga afraad?

*"Kibis maalin nagu filan, maanta na sii."*

125. Maxaan ugu ducaysanaa codsiga afraad?

*In Ilaah na siiyo baahiyadeenna xagga jidhka iyo naftaba.*

**AX:** Filiboy 4:19, "Ilaahaygu wuu idin siin doonaa wixii aad u baahan tihiin oo dhan, sida ay tahay hodantinimadiisa xagga ammaanta Ciise Masiix ku jirta."

126. Muxuu yahay codsiga shanaad?

*"Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan."*

127. Maxaan ugu ducaysannaa codsigan shanaad?

*In Ilaah naga dul qaado culayska dembigeenna Coose Masiix awgii, oo uu noo fududeeyo in aan cafino kuwa dhaawaca inoo gaystay.*

**AX:** Matayos 6:14-15, "haddaad dadka u cafidaan xumaantooda, Aabbihiinna jannada ku jira ayaa idin cafiyi doona. Laakiin haddaanad dadka cafiyin. Aabbihiinnu xumaantiinna idiin cafiyi maayo."

128. Muxuu yahay codsiga lixaad?

*"Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga du."*

129. Maxaan ugu ducaysanaa codsigan lixaad?

*In Ilaah dembiga naga Ilaaliyo.*

**AX:** 1 Korintos 10:13, "Jirrabaadna idinma qabsan tan dadka wada qabsata mooyaane, laakiin Ilaah waa aamin, mana oggolaan doono in laydin jirrabo intaad karaysaan in ka badan, laakiin markii laydin jirrabo wuxuu samayn doonaa jid aad kaga baxsataan si aad ugu adkaysan kartaan."

## Taxanaha N
## Su'aalo iyo Jawaabo ku Saabsan Sakrament-ga (dabaaldegyada)

130. Meeqa sacrament (dabaaldeg) ayaa jira?

*Labo.*

131. Maxay kala yihiin?

*Baabtiiska iyo Cashada Rabbiga.*

132. Yaa jideeyay Sacrament-ga

*Sayid Ciise Masiix.*

133. Muxuu Masiixu u jideeyay sacrament-ga?

*Si uu xertiisa uga gooni yeelo adduunka oo uu nasiino iyo xoog u siiyo.*

**AX:** Yooxanaa 17:11b, "Aabbe Qoduusow, iyaga ku hay magacaagii aad i siisay, inay mid ahaadaan sideenna oo kale."

134. Maxaa baabtiiska loo adeegsadaa?

*Waa biyo lagu maquuriyo.*

135. Maxay tani calaamad u tahay?

*Waxay calaamad u tahayin dembigeennii dhiigga Ciise Masiix nalooga nadiifiyey.*

136. Yaa iska leh magaca nalagu baabtiisay?

*Waa magaca Aabbaha, iyo Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah.*

137. Muxuu baabtiisku kugu xidhayaa?

*Inaad noqotid mid Ciise Masiix raaci u ah.*

**AX:** 1 Yooxanaa 1:7, "laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa, oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifiyaa dembi oo dhan."

**138. Waa kuwama kuwa la baabtiisayo?**

***Rumaystayaasha dib u dhashay.***

**139. --------------------**

140. Miyuu Ciise Masiix daryeelaa carruurta?

*Haa maxaa yeelay isaga ayaa yidh, "lmaha yaryar daaya, ha ii yimaadeene. hana diidina, waayo, kuwan oo kale ayaa ka mid ah boqortooyada Ilaah."*
**AX:** Falimaha Rasuullada "ballanka waxaa leh idinka iyo carruurtiinna iyo kuwa fog oo dhan in alla intii Rabbiga Ilaaheenna ahu u yeedho."

141. Maxay tahay Cashada Rabbigu?
*Cunista roodhida iyo cabista canabku waxa ay xusuus u yihiin silicii iyo dhimashadii Masiixa.*

142. Muxuu roodhigu u taagan yahay ama ka tarjumayaa?
*Waa xusuustii jidhkii Masiixa oo loo jebiyey innaga dembiyadeennii.*

143. Muxuu koobka canabka ahu u taagan yahay ama ka tarjumayaa?
*Waa xusuustii dhiiggii Masiixa oo loo daadiyey innaga badbaadadeenna awgeed.*
**AX:** 1 Korintos 11:26 "mar alla markaad kibistan cuntaan oo aad koobkan cabtaan, waxaad muujinaysaan dhimashada Rabbiga ilaa uu yimaado."

144. Yaa ka qayb gelaya Cashada Rabbiga?
*In alla intii ka tawbad keenta dembiyadooda, oo runaysata badbaadada Masiixa, jeclaatana dadkooda ku xeeran iyaga.*
**AX:** 1 Korintos 11:27-29, "Taas aawadeed ku alla kii kibista u cuna ama koobka Rabbiga u cabba si aan istaahilin, jidhka iyo dhiigga Rabbigu dushiisay noqon doonaan.
28 Nin kastaa ha is-imtixaamo, oo sidaas kibista wax ha uga cuno, oo koobka ha uga cabbo. 29 Waayo, kii cuna oo cabba, xukun ayuu naftiisa u cunaa oo u cabbaa isagoo aan jidhka garanaynin."

## Taxanaha O
## Sideen Ku Ogaan Karaa inuu Mar Kale Imanayo

145. Miyuu Masiixu ku sii jiray markii iskutallaabta lagu qodbay kaddib?
*Maya; maalintii saddexaad ayuu xabaashii ka sare kacay dhimashadiisii kaddib.*

146. Halkeebuu Masiixu jooggaa imminka?
*Waxa uu joogaa samada, si uu dembiyadeenna u dhexdhexaadiyo.*
**AX:** Cibraaniyada 4:14-16, "Haddaba innagoo leh wadaad sare oo weyn, kan samooyinka sii dhex maray, kaas oo ah Ciisoo Wiilka Ilaah ah, aynu qirashadeenna xajinno. 15 Waayo, ma aynu lihin wadaad sare oo aan itaaldarradeenna ka nixi karin, laakiin waxaynu leennahay mid si walba loo jirrabay--- oo aan weliba dembi lahayn. 16 Haddaba aynu carshiga nimcada dhiiranaan ugu soo dhowaanno si aynu naxariis u qaadanno oo aynu u helno nimco ina caawisa wakhtiga baahida."

147. Miyuu mar labaad soo noqon doona?

*Maalinta ugu dambaysa ayaa Masiixu u soo laaban doonaa inuu caalamka xukumo.*

**AX:** Matayos 25:31-32, "Goortii Wiilka Aadanahu ammaantiisa ku yimaado, isaga iyo malaa'igaha oo dhan, markaasuu carshiga ammaantiisa ku fadhiisan doonaa.
32 Quruumaha oo dhan ayaa hortiisa lagu soo ururin doonaa oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha."

148. Side e bay aadanuhu noqonayaan kolka ay dhintaan?

*Jidhku carro ama boodh ayuu dib u noqonayaa, naftuna xagga dunida ruuxda.*

149. Miyaa dadkii dhintay jidhkoodii mar kale dib usoo noolaanayaa?

*Haa; "buunku waa dhawaaqi doonaa oo kuwii dhintayna qudhunla'aan baa la sara kicin doonaa."*

**AX:** Yooxanaa 5:28-29, "Taas ha la yaabina, waayo, saacaddu waa imanaysaa markii kuwa xabaalaha ku jiraa dhammaantood ay codkiisa maqli doonaan, 29 wayna ka soo bixi doonaan, kuwa wanaagga falay ilaa sarakicidda nolosha, kuwa sharka falayna ilaa sarakicidda xukunka."

150. Maxaa kuwa sharka leh ku iman doona maalinta xukunka?

*Waxaa lagu ridi doonaa cadaabta.*

151. Waa maxay cadaabtu?

*Waa meel aad u xun oo ay silic iyo murugo ka buuxaan.*

152. Maxaa kuwa xaqa ahna ku iman doona?

*Xagga jannada ayaa loo qaadi doonaa.*

153. Waa maxay janno?

*Waa meel ammaan iyo farxad leh halkaasoo ay kuwa xaqa ahu weligood Rabbiga la joogi doonaan.*

**AX:** Matayos 13:49, "49 Sidaasay ahaan doontaa dhammaadka wakhtiga dunidu. Malaa'igahu way soo bixi doonaan oo waxay kuwa
sharka leh ka dhex sooci doonaan kuwa xaqa ah,"